



Sumad: SF/CLC/04/06/PR1

Taariikh: Sabti 12/6/04

**WAR SAXAAFADEED: Ururka Somaliland Forum oo Tallooyin ku saabsan Guddiyada Nabadgelyada u diray Madaxweynaha iyo Dawladda Somaliland**

Ururka Somaliland Forum ee ay isku-bahaysteen qurba-joog u dhashay Somaliland ayaa dhawaan u diray Madaxwaynaha Somaliland tallooyin ku saabsan xukunnada degdegga ah ee ay go'amiyaan Guddiyada Nabadgelyadu.

Guddi-hoosaadka Arrimaha Sharciyada iyo Distoorka ee Ururkan ayaa si tifatiran ugu muujiyay xukuumadda Somaliland aragtidooda ku saabsan sii-socodka hawlaha Guddiyada Nabadgelyada oo xukunno kala gaddisan ku rida muwaadiniinta, waxaana uu Ururku tallooyinkiisa si cilmiyaysan ugu sharxay waxa uu ka qabo jiritaanka Guddiyadaas.

Ururku wuxu ka warsugayaa Dawladda mudo cayiman, ka dibna waxay soo bandhigi doonaan aara'dooda ku saabsan arrintan dhawaan.

Ururka Somaliland Forum waxa uu goor walba tallooyin ka dhiibtaa arrimaha dalka ka jira, isaga oo doorar muuqda ka soo qaatay geeddi socodka dimuqraadiyadda ee Somaliland.

Wabillahi Tawfiiq.

**Ururka Somaliland Forum**

---

***“Ururka Somaliland Forum waa urur madaxbannaan oo ay isku bahaysteen qurb-joog reer Somaliland ahi. Waxa uu ururkani aaminsanyahay qarannimada, horumarka iyo madaxbannaanida Somaliland waxanu iskaashi la sameeyaa jaalliyadaha Somaliland ee dalka dibaddiisa ku dhaqan iyo waliba ciddii kale ee danaysa horumarka Somaliland. Ururkani wuxu rumaysanyahay in dadka reer Somaliland ee dibaduhu ay door ka ciyaari karaan horumarinta dalkooda.”***  
**Wixii faahfaahin dheeraada kala soo xidhiidh urur Guddoomiyaha:**

Gudoomiye, Deeqa G Hidig, [chair@somalilandforum.com](mailto:chair@somalilandforum.com)  
Guddoomiye-xigeenka, C/llaahi Cawed [vice@somalilandforum.com](mailto:vice@somalilandforum.com)  
Xoghayaha, Khadar Xasan Cali [secretary@somalilandforum.com](mailto:secretary@somalilandforum.com) ,  
Khasnajiga, Axmed Saleebaan [treasurer@somalilandforum.com](mailto:treasurer@somalilandforum.com) iyo  
Xubin -Guud, Cumar Cabdi Nuux [xubin@somalilandforum.com](mailto:xubin@somalilandforum.com)